

Qiyaas ahaan hal qof shanti qof oo reer Fiktooriya ah ayaa yeellan doona jirada dhimirka sanad walba.

Nadaamka caafimaadka dhimirka ee Fiktooriya ayaa ku guuldaraystay inay caawimaan kuwa aadka ugu baahan inay hellaan daawo taya sarre leh, daryeel iyo kaalmo.

Nadaamka hadda ah ayaa lagu sharxay inuu yahay mid burburay.

Dawlada Fiktooriya waxay u asaastay Royal Commission Nadaamka Caafimaadka Dhimirka Fiktooriya. Ilaa hadda waxaa jiray in ka badan 8,200 oo ka qaybqaadasho oo ka yimid bulshada reer Fiktooriya.

Waxaa hadda dadweynuhu helli karaan warbixin ku meel gaara.

Tani maaha warbixintii ugu dambaysay. laakiin waxay samaysay talooyin si loo bilaabo wax ka qabashada baahiyaha degdegta ah. Waxay kaloo caawimaysaa diyaarinta dib u eegis ballaaran oo nadaam kaas oo daba socon doona warbixinta ugu dambaysa ee Guddiga.

Xukuumada Fiktooriya waxaa ka go'an hirgelinta dhamaan talooyinka ay soo jeediyeen Guddigu.

Talooyinka warbixinta ku meelgaark ah waxaa ku jira:

- Asaasida Xarunta Iskaashiga reer Fiktooriya ee caafimaadka dhimirka iyo samaqabka
- Ku darida 170 sariirood oo loogu talagalay caafimaadka dhimirka aadka u ba'an
- Ballaarinta daryeel la-socod iyo kaalmaynta dadka isku deyey inay isdilaan
- Asaasida adeeg degaan kaas oo ay asaaseen ayna bixinayaan dad la nool waaya-aragnimadaa **iyo** siyaadinta tirada shaqaale leh waaya-aragnimada la noolaansha jiradaan.
- Ballaarinta adeegyada dawlad gobleedka oo dhan ee dadka aborijiniska ah ee reer Fiktooriya.
- Xoojinta shaqaalaha caafimaadka dhimirka iyo samaynta hogaamiyayaal
- Xaqijinta siyaadin wax ku oolla xagga maalgelinta caafimaadka dhimirka
- iyo abuurista xafiis u heellan bilaabida talooyinka Guddiga.

Shaqadayadu halkaas kuma istaagayso. Waxaanu bixin doonaa warbixinta ugu dambaysa Oktoobar 2020, taas oo bixin doonta hanaan xoogan oo wax ka qabanaya xagga dib u hagaajinta nidaamka caafimaadka dhimirka ee dadka la nool jirada dhimirka, qoysaskooda, daryeellayaasha iyo bulshada.